

Refugee Seniors in the United States

Qaxootiga waayeelka ah ee Maraykanka

Full Script

Qoraalka oo dhamaystiran

Time	Speakers	Script
Wakhti	Qofka hadlaya	Qoraalka
0:09-0:41	<p>Moti and Kaushila Rizal, Bhutan</p> <p>Mooti iyo Kooshila Risaal, Butaan</p>	<p><i>We were in Bhutan and we were treated very cruelly by the Bhutanese government.</i></p> <p>Waxan joogney Butaan oo dawladda Butaan noola dhaqantey si naxariis daran.</p> <p><i>There was gunfire, that's why we had to abandon our property and leave Bhutan.</i></p> <p>Rasaas ayaa dhacaysey, taasaa nagu keliftay inaan hantidayadii ka cararno oo an ka baxno Butaan.</p> <p><i>We had gathered all our food at home, but we were unable to eat. The children were very young. We grabbed some chickens and left in the middle of the night.</i></p> <p>Waxaanu urursanay cuntadi guriga noo taal, oo aan cuni kari wayney. Caruurta aad bey u da' yaraayeen. Waxan sii qaadanay dhowr digaag ama dooro, waxaan huleelay saqdii dhexe.</p> <p><i>We left in the middle of the night. Early in the morning we were in India.</i></p> <p>Waxaan baxney saqda dhexe. Subaxnimadiina waxaan joognay Hindiya.</p>
0:40-0:43	(Off camera)	Did you walk?

		Miyaad lugeyseen?
0:43-0:52	Moti and Kaushila Rizal, Bhutan Mooti iyo Kooshila Risaal, Butaan	<p>Yes, we walked. When we were in India it was daylight.</p> <p>Haa, waanu lugeynay. Markaan Hindiya galney maalin cad bey ahayd. Caruurtii waxay yiraahdeen waan gaajeysanahay, hase yeeshee wax cunto ah maanaan haysan.</p> <p>The kids said they were hungry, but we had nothing to eat. There were tears rolling down my cheeks, and the kids were crying too.</p> <p>Ilmo ayaa iga da'aysay, caruurtuna way oyayeen.</p>
0:59-1:22	Moti and Kaushila Rizal, Bhutan Mooti iyo Kooshila Risaal, Butaan	<p>We wanted to go back to Bhutan, Bhutan, Bhutan, but nothing happened. Since we could not go back, there were organizations that wanted to help us.</p> <p>Waxan rabnay inaan ku noqono Butaan, Butaan, Butaan, hase yeeshe ma suurto galin. Madaama an Butaan ku noqon kari weynay, waxa jirey ururo rabey inay na caawiyaan.</p> <p>Finally we are here and let's see how it goes.</p> <p>Aakhirii halkan ayaan nimid, bal an aragno siday wax u dhacaan.</p> <p>People said you have to be able to do anything and eat anything in America. During orientation, we were told we can practice our own beliefs. For people who want to practice their traditions, they can do so, and we are doing the same.</p> <p>Dadku waxay nagu yiraahdeen Maraykanka gudhiisa waxaad rabtid ayaad qaban kartaa oo waxaad rabtid ayaad cuni kartaa. Marka</p>

		hanuuninta waxa na loo sheegay inaan caabudi karno diintayada noo gaarka ah. Dadka raba inay ku dhaqmaan hiddahooda, way kari karaan, oo sidaasaan annaguna yeelnay.
1:34-1:37	Salah Razoqi, Iraq Saalax Rasooqi, Ciraag	The weather is so beautiful today. Cimiladu maanta aad ayay u qurux badantahay.
1:36-1:38	(Off camera)	It really is. Runtii way tahay.
1:39-2:24	Salah Razoqi, Iraq Saalax Rasooqi, Ciraag	I wish the weather were like this every day. Waxan jeclaan lahaa inay hawadu sidan oo kale tahay maalin walba. The people are so nice, the streets are so beautiful. Dadku aad bey u fiicanyihiin, waddooyinkuna add bey u qurux badanyihiin. As you know, there was a war in Iraq and a lot of crisis there. A lot of things were not available for Iraqis – no electricity, no water, just darkness. Sidaad ogtihiin, dagaal ayaa ka dhacay Ciraaq oo waxa ka jira qalaalase badan. Waxyaalo badan ayaaney Ciraaqiyaantu haysan – koronto male, biyo male, mugdi kaliya. Of course, here in America, thank God there’s safety and electricity exists. There’s a better life here. People are so nice and the country is so clean. Thank God we’re very comfortable here. Xaqiiqda, halkan Maraykanka, Ilaahay mahaddii

		waxa ka jira nabadgelyo iyo koronto.
2:25-3:02	Salah Razoqi, Iraq Saalax Rasooqi, Ciraag	Our first goal here in America was to learn English. I speak English with my wife, my daughters, and my son. Our TV and cable is in English so we hear English all the time. Sometimes I go to the supermarket and speak English with the employees. Besides that, my caseworker gives me lessons 2-3 days per week. So thank God we're learning. Yoolkayaga koowaad ee halkan Maraykanka wuxu ahaa in aan Af Ingriisiga barano. Waxaan Af Ingriisiga kula hadlaa xaaskayga, hablahayga, iyo wiilkayga. Barnaamijka telefishinkayagu waa Af Ingriisi oo waxaan maqalnaa Af Igriisiga goor kasta. Mar mar waxaan tagaa dukaamada oo waxaan Af Ingriisi kula hadlaa shaqaalaha. Taa ka sokow, qofka kiiskayga maamula ayaa casharo ii dhiga 2 ilaa 3 maalmood todobaadkii. Waa Ilaahay mahaddii inaan wax baranayno.
3:03-3:05	ESL teacher 1 Macalinka 1aad ee ESL	Ah, good morning. Subax wanaagsan.
3:06-3:07	ESL class Fasalka ESL	Good morning Subax wanaagsan
3:07-3:09	ESL teacher 1 Macalinka 1aad ee ESL	How are you today? Sideed tihiin maata?
3:09-3:10	ESL class Fasalka ESL	Good. Fiican.
3:11-3:23	Shay Mahat,	I came from Somalia. I left because of the war.

	Somalia Shay Mahad, Soomaaliya	Waxan ka imid Soomaaliya. Dagaalka ayaan ka soo tagey.
3:24-3:25	ESL teacher 1 Macalinka 1aad ee ESL	Where are you from? Waddankeed ka soo jeeddaa?
3:26-3:27	Shay Mahat, Somalia Shay Mahad, Soomaaliya	I am from Somalia. Waxan ka soo jeedaa Soomaaliya.
3:28-3:40	Shay Mahat, Somalia Shay Mahad, Soomaliya	First, my wife and my 4 children came here. Then, after 5 years I came. Ugu horraan waxa halkan yimi xaaskeyga iyo afartayda caruur. Shan sano ka dib ayaan anigu imid.
3:41-3:42	ESL teacher 1 Macalinka 1aad ee ESL	Do you have children? Caruur ma leedahay?
3:43-3:47	Shay Mahat, Somalia Shay Mahad, Soomaaliya	Yes, I have four. Four children. Haa, waxan leeyahay labo, seddex, afar. afar. afar caruur ah.
3:48-4:09	Shay Mahat, Somalia Shay Mahad, Soomaliya	School isn't bad, it's good. When I go there in the morning... School isn't bad for me, it's fine. Those who are wise can and those who are not, don't get it. Dugsigu ma xuma, wuu fiicanyahay. Markaan subaxdii halkaa gaadho ... Dugsigu iima xuma

		<p>aniga, wuu fiicanyahay. Kuwo aqliga lihi way fahmi karaan, kuwa aan lahayna fahmi maayaan.</p>
4:10-4:53	<p>Ma Khin Nwe Nwe, Burma</p> <p>Ma Khin Nwe Nwe, Berma</p>	<p>If you live as a refugee in Malaysia, you are subject to get arrested. And there is not any social support at all. You'll be in big trouble. It's much worse in Malaysia. But for me, I had a husband, so I didn't have such trouble.</p> <p>Haddaad qaxootinnimo ugu nooshahay waddanka Maleeshiya, xadhig ayaad muutaysan. Wax caawimaad bulsho ahna haba yaraate ma jiraan. Dhibaato weyn ayaad la kulmi. Aad ayay Maleeshiya u xuntahay. Laakin anigu maadaama an nin leeyahay dhibaataadaas oo kale ma lahayn.</p> <p>When I first came here, there were only Chin and Karen people around here. There are ethnic groups from Burma. With their help, here I am, the only Burman. I live with them as my own family and children in this house.</p> <p>Markii iigu horreysay ee an halkan imid, waxa meelahan ku noola kaliya qoomiyadaha Chin iyo Karen. Qoomiyadahani waxay ka soo jeedaan Berma. Cawimadooda darteed, way i kan, qofka keliya ee ka soo jeeda qoomiyadda Berman. Waxaan gurigan iyaga kula noolahay sidii qoyskayga iyo caruurtaayda oo kale.</p>
4:54-4:55	<p>ESL teacher 1</p> <p>Macalinka 1aad ee ESL</p>	<p>Where are you from?</p> <p>Waddankeed ka soo jeedda?</p>
4:56-4:57	<p>Ma Khin Nwe Nwe, Burma</p>	<p>I am from Burma.</p>

	Ma Khin Nwe Nwe, Berma	Reer Berma ayaan ahay.
4:57-4:59	ESL teacher 1 Macalinka 1aad ee ESL	Burma. Berma.
4:59-5:15	Ma Khin Nwe Nwe, Burma Ma Khin Nwe Nwe, Berma	It would be good if refugees have learned some basic English, and if they're able to work. There will be some difficulties if they aren't able to work like me. Waxa fiicnaan lahayd inay qaxootigu barteen qadar Af Ingriisi oo asaas ah, ayna shaqaysan karaan.
5:16-5:35	Mohammed Mohammed, Sudan Maxamed Maxamed	The most difficult thing when you come to America is if you can't speak English. It will be hard. Arrinta ugu dhibka badan markaad Maraykan timaadid waa haddii aanad ku hadlin Af Ingriisi. Aad bay u adagtahay. I came here to America and I found life is different and everything is organized. Markaan halkan Maraykanka imid waxan la kulmay nolool geddisan iyo wax kasta oo habaysan. There's a war over there and it's well known. Dagaal ayaa ka jira xaggaas, waana la wada ogyahay.
5:36-6:02	Mohammed Mohammed, Sudan Maxamed	I work at "First Star Paper". Waxan ka shqeeyaa "First Star Paper." I work with a group of other people during the night shift. We collect the papers and organize them in cartons then take

	Maxamed	<p>them to the warehouse.</p> <p>Waxan la shaqeeyaa koox kale oo kaalinta habeenkii ah. Waxan soo ururinnaa wargeysyada oo an ku habaynaa kartoono markaana gaynaa bakhaarrada.</p> <p>I can barely speak English, but I have friends who speak English. It's hard, but hopefully we'll learn the language.</p> <p>Ku hadalka Af Ingriisigu aad bu iigu yaryahay, hase yeeshe waxan leeyahay saaxibbo ku hadla Af Ingriisiga.</p>
6:03-6:16	ESL teacher 1 Macalinka 1aad ee ESL	<p>So everybody now has two homes, has two homes, and this is okay. You have one home that has your heart, your memories, and one home here. How are you this morning?</p> <p>Markaa qof walba hadda wuxuu leeyahay labo hoy, labo hoy, taasina waa hagaag. Hoygaaga kowaad wa ka qalbiga kuugu jira, xasuustaada, hoyga kalena waa halkan. Sideed tahay subaxdan?</p>
6:17-6:18	Moti and Kaushila Rizal, Bhutan Mooti iyo Kooshila Risaal, Butaan	<p>I'm fine.</p> <p>Waan fiicanahay.</p>
6:18-6:19	ESL teacher 1 Macalinka 1aad ee ESL	<p>You are fine.</p> <p>Waad fiicantahay.</p>
6:19-6:42	Moti and Kaushila Rizal, Bhutan	<p>I feel like they teach us well, and I know my stuff during the class, but I tend to forget afterwards. Little by little I'm learning, it's great that they're teaching us. They're teaching</p>

	<p>Mooti iyo Kooshila Risaal, Butaan</p>	<p>us well. We learn there and then when we leave school, and by the time we arrive at home, we forget. What happened?</p> <p>Waxan dareemayaa inay si fiican wax noo barayaan, waanan aqaanaa waxayga markaan fasalka ku jiro, hase yeeshe waan illaawaa hadhow. Aayar aayar ayaan wax u baranayaa, aad ayay u fiicantahay inay wax na barayaan. Si fiican bay wax noo barayaan. Wax baan halkaa ku baranaa, markaasaan dugsiga ka baxnaa, isla marka guriga la gaadhana waan illoownaa. Maxaa dhacay?</p>
<p>6:42-7:10</p>	<p>Salah Razoqi, Iraq</p> <p>Saalax Rasooqi, Ciraaq</p>	<p>Of course, when someone can't speak English here, it's very hard. But I'll tell you something. If someone has relatives here, it will help a lot. Like my wife – she can speak English as well as my daughters. My son also speaks English and even I have a good background in English, but if someone doesn't speak English, they have to learn.</p> <p>Dabcan, halkan qofku haddii aanu Af Ingriisi ku hadli Karin, aad bay u adatahay. Laakin mid baan kuu sheegayaa. Haddii qofka ehelo u joogto halkan, wax badan bay ka caawin kartaa. Sida xaaskeyga oo kale – Af Ingriisiga si fiican ayay ugu hadashaa sida hablahayga oo kale. Wiilkayguna wuu ku hadlaa Af Ingriisi, oo xataa anigu khibrad fiican baan u leeyahay Af Ingriisiga, hase yeeshe qofku haddaanu ku hadal Af Ingriisiga, waa inay bartaan.</p>
<p>7:11-7:15</p>	<p>Salah Razoqi, Iraq</p> <p>Saalax Rasooqi, Ciraaq</p>	<p>But as I said, you need to be patient.</p> <p>Laakiin sidan hore u idhi, waa inaad samirtaa.</p>

7:15-7:16	ESL teacher 2 Macalinka 2aad ee ESL	Good morning! Subax wanaagsan!
7:16-7:17	Moti and Kaushila Rizal, Bhutan Mooti iyo Kooshila Risaal, Butaan	Good morning. Subax wanaagsan.
7:18-7:20	ESL teacher 2 Macalinka 2aad ee ESL	Hi. Have a seat. Haloow. Fadhiiso.
7:21-8:05	Moti and Kaushila Rizal, Bhutan Mooti iyo Kooshila Risaal, Butaan	<p>My help... I have insurance for the hospital and medicine. I'm taking those medications. If I have to go to the hospital, I ask my kids or I just stay home because I can't go anywhere by myself.</p> <p>Macaawinaydada ... Waxan caymis u haystaa cisbitaalka iyo daawooyinka. Waxan qaata daawooyikaas. Haddaan u baahdo in aan cisbitaal tago, waxan weydiiyaa ilmahayga ama gurigaan iska jooga waayo keligay meelna ma tegi karo.</p> <p>I think, "Where am I?" and I get lost. I haven't learned to get around here. When I look at the signs, I just understand "bus" and "train" and nothing else. I understand that because I learned something in the village.</p> <p>Waxan ku fakiraa, "xaggee baad joogtaa?" oo waan dhumaa. Maan baran sida meelahan loo mar maro. Markaan eego tabbeellayaasha waxaan ka fahmaa keliya "bas" iyo "tareen." Intaa waan fahmayaa waayo waxbaan ku bartay</p>

		<p>tuulada.</p> <p>I wonder how we will spend our lives in the future. I can't get around by myself. I really can't.</p> <p>Waxa fajac igu ah sidaan noolasha ugu noolaan lahayn wakhtiga soo socda. Keligey meel ma aadi karo. Runtii ma aadi karo.</p>
8:15-8:31	<p>Ma Khin Nwe Nwe, Burma</p> <p>Ma Khin Nwe Nwe, Berma</p>	<p>If you have good health and are able to work, you can earn a lot of money, which will be very good for your life. If, however, you aren't healthy enough to work, you will face difficulties.</p> <p>Haddii ad caafimaad qabtid oo ad shaqayn kartid, lacag badan ayaad samayn kartaa, taaso aad ugu fiican noloshada. Haddii se aanad qabin caafimaad oo aanad shaqayn Karin, waxaad la kulmaysaa dhibaatooyin.</p>
8:47-8:03	<p>Salah Razoqi, Iraq</p> <p>Saalax Rasooqi, Ciraaq</p>	<p>My advice for the refugees is to be patient. That's the most important thing. They shouldn't rush and they should take everything step by step.</p> <p>Talada an qaxootiga siinayaa waa samir yeesha. Taas ayaa ah arrinta ugu muhiimsan. Waa inaanay ku degdegin oo waa inay wax walba talaabo talaabo u qaadaan.</p>
9:05-9:37	<p>Shay Mahat, Somalia</p> <p>Shay Mahad, Soomaaliya</p>	<p>Now I have few difficulties. I understand the system and I've gotten used to it. I can go places myself. All I can tell them is that this place is good. America is good, it's not like Somalia.</p> <p>Hadda dhibkaygu wuu yar yahay. Nidaamka waan fahmay oo waan la qabsaday. Keligay ayaan meelo tagi kara. Waxan guud ahaan u shegayaa inay meeshani fiicantahay. Ameerika</p>

		way fiicantahay, Soomaaliya oo kale maaha.
9:46-10:36	<p>Moti and Kaushila Rizal, Bhutan</p> <p>Mooti iyo Kooshila Risaal, Butaan</p>	<p>Everything is fine so far, but we don't know what will happen in the future. We can't work. We don't know what will happen then. We want at least one of our sons to study. The youngest son doesn't even work. I have a dream that he will study. We're uncertain about our future. Sometimes I worry that we won't be able to pay the rent. That's what I feel.</p> <p>Wax walba ilaa hadda way fiicanyihiin, hase yeeshe ma hubno wixii dhici doona mustaqbalka. Ma shaqayn karno. Markaa ma ogin wixii dhici doona. Ugu yaraan waxaan rabnaa inuu wilasheenna midkood wax barto. Wiilka ugu yar xataa ma sheqeeyo. Waxan ku riyoodaa inuu wax baran doono. Ma hubno mustaqbalka noloshayada. Mar mar waxaan ka warweraa inaan bixin kari weyno ijaarka guriga. Sidaas ayaan dareemaya.</p> <p>I think if we get educated and learn things, then we will be able to do something in this country. Even if I can't, I want my kids to.</p> <p>Waxan u malaynayaa haddaan wax barano, inaan wax ku qabsan karno waddankan. Xattaa haddi an anigu kari waayo, waxaan rabaa inay caruurteydu sidaa yeelaan.</p>